Somalida waa dad leh madax eey ka danbeeyaan taas waxeey daliil utahay in eey lahaayeen ilbaxnimo fog , soo bandhigida arinkan waxeey naxdin ku tahay Abuufulaanka Timirta faraqa loogu soo riday ee damaciisa yahay in oow xaqiro Umadan dhaqanka iyo Diinta Islaamka in eey ku xidideeysatay. sidoo

kale waxeey naxdin ku tahay cilmaaniga loo soo meeriyay in Somalida weligood geeleey reer guuraa ahaan jireen waa sida loogu soo dhigay Buugaagta loosoo xanbaariyay weliba wiil galbeed ku dhashay oo asalkiisii Lo`leey ahaa, ninkii Dibida ladagaalami jiray Buugaatii oow qoray ninka kil-kilaha kusitoow bal aqriso magacyada madaxda Somalida lahaan jirtay kahor inta aadan Doomaha nagu soo weerarin , Daarihii aad dumisay weli asaaskoodii ayaa noo muuqdo in aad deb qadad siiday Kutubadaada ayaad ku qortay lkn waxaa wanaagsaneeyd in aad runta usoo sheegtid arayga aad soo cimaamaday ee aad usoo meeyrisay cilmaani nimada .

_____-

Boqor

waa magac loo bixiyo ruuxa Daldhan xakumo waana wax

yaabaha salka u ah in Somali lahaan jirtay madax laqadariyo .Afcarbeed ma ahan sidoo kale af gaalo kama soo jeedo mana ahan af itoobiyaan waa erey Somali ah waana la isticmaalaa hada.

ereyga Boqor cida ugu badan ee isticmaasho waa qabiilka Daarood siiba reer bariga.

waatii eey dhijireen reer Boosaaso " Bad kasoo bax Boqor baaleh"

xeebta hadii eey kusoo caariyaan alaab waxaa loo geeyi jiray Boqorka waana dhaqanka magaalada.

Boqorka hadii laga dhaxlo madaxtinimada waxaa loogu yeeraa "boqortooyo"

Garaad

waxuu udhigmaa **Boqor** lkn darajo ahaan ma gaarsiisna Boqornimo waayo Boqor waa darajada ugu sareeyso ee ruux Somali ah lasiiyo. ereyga garaad & **Ugaas** waxaa badanaa isticmaalo isla Qabiilka Daarood. (Beeldaaje, waa lamid)

Wabar,Malaaq, Islaw.

sadax daas erey waa Afsoomaliga qadiimka ah waana magac lasiiyo cida maxada ah .

Qabiilka adeegsado ereygaas waxaa ubadan, Hawiye, Digil& mirifle, Dagoodi.

Arar iyo afeef.

Somalida waxeey ubateen looma dhama .
waa run arinkaas waana qabyo magacyada loo adeegsado madaxda Somalida lkn ujeedkeena waxuu ahaa in aan muujino ereyo Somali

sax ah .

Beelaha Somaliyeed waxeey adeegsadaan ereyo kale asal ahaan kasoo jeedo Afcarbeed.

maxadweeyne waa afcarabi la fasiray kadibna la isticmaalay .

islaan, imaam, suldaan.

sadax daas magac waxaa kala isticmaalo

Sulaan ,Dirta koonfureed ayaa isticmaasho

Islaan ,Daarood ayaa isticmaalo(Islaam ayuu kasoo jeedaa ereyga)

Imaam , Hawiye ayaa isticmaalo.

Caaqil, aqoonyahan. dadka aqoonyahanka ayaa adeegsado

---

su` aal isweeydiin mudan

Qabiilada degan Boosaaso & Burco iyo hareeradeeda

waxeey isticmaalaan magacyo asalka Somaliga kusaleeysan

sida Boqor Garaad Guurti.iwm. su `aasha suuqa lakeenay waxeey kudhisan tahay Carab ayeey kasoo jeedaan sidee loo dhihi karaa dad iyagii laga soo gaaray Afsomaliga siiba lahjada maxaatidhi **?**

jawaabta adiga oon meel fog kadoonin tusaale usoo qaado caruurta lagudhalay UK sinji ahaan waa Somali lkn luqad agaan waa Ingiriis Diin ahaan waa Muslim .

sidookale Somalida badankooda asalahaan ayeey kasoo jeedaan dhankaas , sida cilmiga lagu xaqiijiyay lkn wey dhalan rogmeen luqada Somaliga 75% waa maxali 25% waa afcarbeed .

 # N G O. isir- raaca Somalida. (2014)

Isir-raaca Somalida marka laga hadlaayo qaar waxaa jiro Gumeestihii qarash ku siiyay in eey Somalida u qeey biyaan Wadaad + Waranle

waxeeyna kuu sheegayaan in Somalida eeysan waxba isku eheeyn fikirka noocaas ah ilaa waqtigaan qarash fiican baa la geliyaa

heer waxoow gaaray la sameeyay beelo aanan jirin sida Beesha (Waable) = waxeey rabeen in eey sameeyaan dalad eey ku mideey san yihiin xirfad leeyda Somalida iyaga oo ka toloobaayo beelaha eey ka soo jeedaan asal ahaan.

MARUNBAA IN SOMALIDA EEY SIDA SHAATIGA U BADA SHAAN QABIILKOODA ?

Waa suura gal waana wax ubaahan in baaritaan lagu sameeyo lkn aniga waxaan qabaa fikirka ah

Majiro Qabiil dhan oo inta magaciisa bedelo Qabiil kale ku heeyb sheeganayo

Tusaale aan usoo qaato

Waxaa jiro 1 Qabiil oo qaar iyaga kamid ah eey degaan Gobolka Gedo qaarkalana eey dagaan CABUUD WAAQ

Ruuxa Dalka sifiican ukala yaqaano waa garan karaa inta dhul ee u dhaxeeyso labadaas Magaalo . waxaa is weey diin mudan hadii Qabiilka sida Maska oo kale u-xuub siibanaayo, Qabiilkan maxeey asalkoodkii uga guuri waayeen qolada aan soo sheegay?

Waxaa lamid ah Qabiilka degan magaalada Marka iyo Baadiyaheeda waxeey isku heeyb yihiin

Qabiilka ugu badan magaalada Hargeysa waa sida eey Somalida badan kooda aamin san yihiin inta aan kawar qabo.

QABYAALADA SIDEE LOO JOOJIN KARAA?

Hadii la helo Dowlad cadaalada ka shaqeeyso eex wax ladhaho agteeda eey ka xaaraantahay

Si fudud ayuu u dhamaanayaa Qabyaalada Somalida dilootay

Wiilka Somaliga marka oow dareemo in oow leeyahay Dowlad awood badan oo usoo dhiciso xaqiisa marka ladhaco Sidoo kale marka oow gardaran yahay Maxkamad adag

latiigsato ciqaabtuu lahaa marsiiso

Waxoow kusoo dhacayaa wadadii wanaag saneed waxoowna ogaanayaa in Sharciga oow kasareeyo Beesha oow kasoo jeedo iyo darajada oow bulshada dhexdeeda kuleeyahayba (sida nin caan ah ayaan ahay ama qoows hanti leh ayaan kasoo jeedaa)

Islaamka marka oow yimid waxa oow ku daweeyay Cadaalad labadii beel ee 40ka sano ku dagaalamayay Madiina , ruux walba waxoow ogaaday

in oowsan jirin Qabiil sharciga ka difaaci karo mar hadii oow isaga gardaran yahay ,Sidoo kalana xaq oow leeyahay Qabiil duud siinkaro in oowsan jirin

Waa intaas DAWADII NABI MUXAMAD KUDAWEEYAY CUDURKA QABYAALADA.

Hadii ladoonayo in laga itaal roonaado taageerayaasha Qabyaalada waa in looqoraa umadan Dawadii Nabiga kudaweeyay reer Madiina ee kor kuxusan.

Walaaladeen waxaan leeyahay Beelo hor leh oo la sameeyo waxaa ka muhiimsan in la dhayo boogta Somalida dhextaal ee balaayo hor leh yaan buugaagta loogu qorin.

Dood cilmiyeedkii 2aad "Qabiilka & Qaranka"

1983 Jaamacada Umada Somaliyeed waxaa lagu qabtay dood eey kasoo qeeybgaleen

macalimiintii Jaamada waxaana looga dooday ,Qabiil & Qaran waxa eey kala yihiin , qofkii ubaahan Nedka ayeey kujirtaa iyadoo qoran Culimadii halkaas ka hadashay qaabka eey wax ula muuqdeen, waloow xiligaas aanan sidii ladoono loo hadli kareeynin .

1979-1980 iyana waxaa socotay gabayadii

lagula dirirayay Qabyaalada, silsiladii lamagac baxday DEELEEY .

iskusoo duuboo wixii lasheegirabay horay ayaaba loosheegay,

xumaanta eey Qabyaalada leedahayna 30 sano kabacdi in dib leesku xusuusiyo uma baahna

Qabiil & qaab dhaqankiisana in Qalinka qadiisa nooga dhamaato wax wanaagsan maahan .

sadax ayaa Aduunka dulsaaran

1)fikir.

2) Sinjiyada ama Qabiil ama shacab.

3) Dhul ama Dal.

sadaxdaas mid walba waa muhiim lkn Wadaadka waa in oow mudnaanta **1aad** siiyaa fikirka , ujeedka fog ee aqoonta Dunida dulsaaran hadii lasoo hooriyo waxeey kudul wareegtaa FIKIR (cilmi)


Rabi ayaa ka dardaarmay fikirka weliba waxaa lagu amray Nabiga in oow ku duceesto


Rabiyoo cilmiga ii ziyaadi. qofwalboow ogsoonoow ujeedkeena fog & keena aadka usokeeyo waxeey tahay in aan soo saarno jiil

wax walba ka dheregsan markeey noqoto aqoonta. nin cilmi bartay lkn aanan ku camal faleeynin mar-uun in oow ku camal falo ayaa laga yaabaa ,lkn jaahil aanan weligiis cilmi loo xariiqin qarda jeex ka bixi maayo.sadaxda sinji ee aan Somalida uqeeybinay qolo walba waxaan ka dooneeynaa in eey soo saaraan aqoonyahano

Umadaan u horseedo hormar, kuwaasoo hansare leh .

 # Qabyaalada iyo Qalinka







***

Jiirka madoow waa midka lagu tijaabiyo Dawo iyo Cudur.

Afrika iyo Somalida waa halka lagu tijaabiyo Qabyaalada iyo kala qo-qobnaanta si Umadaha looga waa niyo

[2011 ,Marxuumkii Madax weeynaha ahaay waxuu shacabkiisa ugu goodin-jiray sida Somalida ayaad noqon doon tiin hadii Dowladeeyda lamucaarado]

Aqoonyahan ka iyo Qabyaalada

cilmiga sharaf ayuu leeyahay mid aduun iyo mid aaqiro,

lkn waxeey calaama su-aal saaran tahay

qofka aqoon-yahanka noqday nafta ku beeran .

hadii Nafta ku jirto eey tahay mid quruntay waxuu jeclaadaa in oow unoolaado sida Dooliga

waayo Jiirka majecla in oow ka dhex baxo Haanta oow ku weeynaaday

---

dadkii hore waxeey ku noolaayeen Duni cilmiga Aduun iyo hormarka laga gaaray oow iska yar yahay

Waran iyo Gabay ayeey adeegsan jireen.

cid cadaw ah oo Waranka lagu gano hadii lawaayo

Walaal kiis ayuu kula dagaalami jiray.

Gabayga waa mid lagu calaacalo marka colaada dhamaato ama waa mid leesku habaaro ama mid lagu caaytamo

ama waa mid colaad lagu huriyo

cida loo adeegsado badanaa waa Umada aad ka dhalatay .

Umad walba oo Geeljiraha kubadan yahay boqolaal sano gumeeste ragaadiyay eeysan jirin Buugaag xalaal ah oo tagtadeeda lagu keeydiyay

hadii la doonayo in Taariiqdooda la baaro

halka lacugsado waa Gabayada eey dusha ka xifdiyeen

sidii Carabtii Jahliga ku sugneeyd Nabiga inta aan lasoo dirin ka hor .

Jaahiliintii Carbeed ayuu Quraanka ku tilmaamay waayo Qoraal ama Buug wax ugu qoran yahay,

Aqoon Aduun ama mid Aaqiro maba jirin.

gabay kii ahaa hodon beey ka ahaayeen , hadana

Juhalo ayaa lagu tilmaamay waayo Gabyaaga wuxuu ka gabyaa halka aqoontiisa gaar siisan tahay ,

xaafadiisa aqoonta taalo ayuu kuu soo ban dhigaa

waxuuna is mood-siiyaa in Dunida oo dhan sidaas looga dhaqmo.

Kaarkiisa guba Ger-dheere iyo Geeljire!

(Cilmaani iyo siyaasi munaafiq ah cidii xogbadan ka heeyso Bulshada haka waaniso , hana usoo bandhinto siyaabaha qaldan eey u adeegsadaan Qabiilka. waa shardi in aadan eheeyn siyaasi labaday ciil &caloolyoow , damacsan in shacabka uhiiliyaan. Cilmaani kasoo carooday kooxdiisii , lkn cabsan caqiidadooda , ceebahooda raad-raac ku sameey si looga caroodo , kooxda oow kasoo tegay oowna isaga u helo taageerayaal cusub. = "God kaguur Qanje u-guur")

Gardheere 2 kaar ayuu Ardayda baraa mid waa kamasaxan tahay qabyaalada waana Islaamka sida oow kudhisan yahay.

ruuxa dhankaada soo maray Madow miyaa mise waa cadaan Islaamka shaqo kuma lahan arinkaas .

Gerdheere waa isticmaalaa kaarka Qabiilka marka dan kasoo gasho si oow u kala qeeybiyo Bulsho meel wada degan .

(Sheeqa Sharuur madhiibaa?)

waa ka xishoodaa in Idaacad wareeysi kaqaado isagoo Qabiil ka shee keeynayo Weriye caadaqaate ah ayuu qidmad siiyaa waxuu dhahaa kafaalooda

Qabiilka meel hebel degan waa gii Geelooda ladhacay geesinimadii eey ku dhaqaaqeen , Xadiiskan & Aayadaan usoo daliisho barnaamij kaada, falanqeeynta waxaad ku soo xirtaa ragii waagaas goob-jooga ahaa , hoowl Gerdheere Daaha gadaashiisa ka maamulayo ma usocon weeydo. Timirtii Somali lakeenay weli lama talaalin Wadaadka faraqa ayuu kusidaa .

Guba Geel jiraha Kaarkiisa

Geel jiraha cidna waxba kalama dhexeeyo

Waran iyo Gabay kudagaalan ayaa abid lasoo baray

Islaamnimo iyo isaga weey kala dheer yihiin

Qisadii Caa-isho iyo Xafso

Safiyo dhib badan ayeey kala kulantay Caa-isho iyo qoomka eey ka dhalatay ee Carabeed

Dumar leesla qabo kasokoow aflagaado joogta ah ayeey kala kulmeeysay Xaasaskii Carbeed ee Nabiga qabay

maalin ayeey Safiyo Dulsaarneeyd Faras, socodkiisa ayaa gaabiyay Qoomkii eey lasocotay ayeey ka hartay

mudo markii lasocday ayeey Nabiga soo gaartay weey ooyday Nabiga waa aamusiiyay Ilinteeda ayuu Sacabka mariyay , waxeey tilmaantay in Faraska eey fuushantahay oowsan socod aqoon waxeey kacodsatay in laga bedelo Faraska .

Caa-isho ayuu utegay Nabiga waxuuna weey diistay in eey u bedesho Faraska , Caa-isho weey ka carootay arinkaas waxeeyna tiri Yahuudiyada aad qabto miyaad ileedahay sii

Faraskaada?

Xafso ayuu utegay Nabiga iyadana sidaas oo kale ayeey udhaqantay .

Nabiga waa ka carooday arinkaas 1 bil lama hadlin labadooda aflagaadadii eey u geesteen Gabadhaas ayaana loo ciqaabay

سورة التحريم

ayaa soo degtay cid walba canaanta eey mud neeyd ayaa la canaantay

---

Qisada waxaa nooga baxay in Caa-isho iyo Xafso isku deyeen in eey isticmaalaan caadifada Dumarka.

heblaayo Diintooda waa diin Gaalo , farac xun ayeey ka soo jeedaan, Carab ayaa dadka ugu fadli badan Yahuud ayaa dadka ugu liidato .

Caa-isho raali kama ahan in Dumar kale lala guursado

Yahuud ha ahaato ama Carab

lkn Cadawgaada maalintaas kii aad ka adkaan karto ayaa dagaal lagu qaadaa Safiyo ayaa meesha ka muuqato

Nabiga waa lagu diri karaa ayeey maankeeda ka heshay

Nabiga qudbo dheer ayuu aqriyay lkn Carab Qud-booyinkii

Nabiga ma qorin waayo canaantii Carabta lacanaantay ayeey u badnaayeen .

Qud-badii Nabiga waxaa ka mid ahaa

"Yahuud Nabi Muuse ayaa ka dhashay, Yacquub ayeey ka soo farcameen, Yuusuf oo Nabi lasoo diro kan ugu quruxda badan uguna nasab wanaagsan ayaa ka dhashay"

Qureeysh lama caayi karo dhamaantood Nabi Muxamad ayaa ka dhashay Nabi lasoo diro kan loogu jecelyahay waa isaga

**

كانت صفية [ر] مع رسول الله [ص] في سفر وكان ذلك يومها فأبطت في المسير فاستقبلها رسول الله [ص] وهى تبكى

وتقول حملتني على بعير بطيء فجعل رسول الله يمسح بيديه عينيها ويسكتها.رواه النسائي

**

Diinta Islaamka asaas keeda waa kaas

Diin Geel jire badaw ah hogaanka u heeyn karo , sida oow doono ufasiran karo ma ahan

Qabiilkii shalay oow duulaanka ku ahaa Diin loo daliishado ma ahan .Gabaygii shalay oow reer hebel ku maagay , isla gabaygii oo ereyada qaar laga soo bedelay marka suuqa lasoo geliyo , kan usacaba tumayo waa Geel jire kale oo gaalnimada udhaw.

waagii Nabi Suleeymaan Bulshadii Islaamka eheeyd waxeey kala garan waayeen Diinta Islaamka iyo Sirixka.

Rabi waxuu usoo diray 2 Malag si eey ukala bayaaniyaan waxa Diinta tahay iyo waxa Sixirka yahay,

SOMALIDA maanta waxeey isku qaldeen waxa fikir yahay ,waxa Diinta Islaamka tahay , waxa Jinsiyad iyo Qabiil ama

Qoomiyad loola jeedo.

Gumeestaha marka oow kujabay dagaalkii 2aad USA+RUUSHKA+Qaramada midoobay oo markaas la aasaasay waxeey isla garteen in xornimadooda lasiiyo dunida dulman ee gumeestayaasha ku hoos nool xiligaas dhulkeena Afrika 95% waxoow ku hoosnoolaa gumeestayaasha reer yurub.

Tariiqda nuucaas ah caruurta ayaaba iskuulada loogu dhigaa kudheeraan meeyno .

Xiligaas aan xornimada helnay 18 gobol oo kamid ah dhulka Somalida ayaa lasiiyay xornimadooda.

Nabigeena waa ku farxay maalinta oow dib ugu laabtay dhulkiisii oow kudhashay MAKA sidoo kale Rabi Quraan ayuu kasoo dejiyay , soo guryanoqoshada Nabigeena kusoo laabtay MAKA (inaa fataxnaa laka fatxan mubiinan)

maadaama dhulkeenii kaxoroobay gacan shisheeye waxaan hoos kusoo bandhignay 18 kamid ah kuwii ugu horeeyay .

Gobolada sida eey iskugu dhowyihiin ayeey kusocotaa, BTJ(ABC)

1- Awdal:- wuxuu ka kooban yahay afar degmo oo kala ah

-boorame ,oo caasimada gobolka ah
-lug hayo
-zaylac

2- Togdheer oo isaguna ka kooban afar degmo

-burco waa caasimada
-buuhoodle
-shiikh
-oodweyne

3- Waqooyi Galbeed wuxuu isaguna ka kooban yahay afar degmo

-hargeysa oo caasimada gobolka ah
-dacar budhuq
-ber bera
-gebilay

4- Sool wuxuu isaguna ka kooban yahay afar degmo

-laas caanood waa caasimada gobolka
-caynaba
-xudun
-taleex

5- Sanaag wuxuu ka kooban yahay afar degmo

-ceerigaabo waa caasimada gobolka
-ceel afweyn
-laasqoray
-badhan

6- Bari oo isaguna wuxuu ka kooban yahay 11 degmo

-boosaaso oo caasimada ah
-caluula .
-badarbeyla .
-rako
-ufayn .
-waaciya.
-qandala
-qardho .
-xaafuun .
-isku shuban.

7- Nugaal wuxuu ka kooban yahay afar degmo

-garoowe waa caasimada gobolka
-dangorayo.
-ayl.
-burtinle.

8- Mudug isaguna wuxuu ka kooban yahay shan degmo

-gaalkacayo oo caasimada gobolka ah
-galdogob .
-xara dheere.
-hobyo.
-jiriiban.

9- Galguduud wuxuu isna ka kooban yahay sideed degmo.

-dhuusa mareeb oo caasimada gobolka ah
-cadaado .
-balanbale
-ceelbuur
-ceeldheer
-caabud waaq
-gel hareeri

10- Hiiraan wuxuu isna ka kooban yahay shan

-baladweyne waa caasimada gobolka
-buula barde
-jalalaqsi
-maxaas
-matabaan

11- Shabeelada Dhexe wuxuu ka kooban yahay todobo degmo

-jawhar oo caasimada gobolka ah

-balcad
-mahadaay
-cadale
-aadan yabaal
-warshiikh
-ruun nirgood

12- Banaadir oo magaalo madaxda muqdisho
waxay ka kooban tahay sidaan anigu u hayo 15 degmo waana kuwan

-cabdi casiis
-boondheere
-xamar jajab
-xamar weyne
-hawl wadaag
-heliwaa ama huri waa
-hodan
-kaaraan
-shangaani
-shibis
-waaberi
-wada jir
-warta nabada
-yaaqshiid
-dharkeenley

13- Shabeelada hoose wuxuu ka kooban yahay todoba degmo

-marka oo caasimada gobolka ah
-afgooye
-aw-dheegle
-baraawe
-kurtuwaarey
-qoryooley
-sablaale

14- Bay wuxuu ka kooban yahay shan degmo

-baydhabo waa caasimada gobolka
-buurhakabo
-diinsoor
-qansaxdheere
-bardaale

15- Bakool wuxuu isna ka kooban yahay shan degmo

-xudur waa caasimada gobolka
-ceelbarde

-rab dhure
-tiyeglow
-biyooley

16- Jubada dhexe wuxuu ka kooban yahay afar degmo

-bu'aale oo caasimada ah
-dujuma
-jilib
-saakow

17- Gedo wuxuu isna ka kooban yahay lix degmo

-garbahaarey oo caasimada gobolka ah
-baardheere
-beledxaawo
-doolow
-ceelwaaq
-luuq

18- Jubada hoose wuxuu ka kooban yahay shan degmo

-kismaanyo oo caasimada ah
-afmadow
-badhaadhe
-xagar
-jamaame

#xornimo & madax banaani .

Kunaaloo xonimada

Somalida lamid amahan Carabta waayo Somalida eray bixinta eey siiyeen cidii kusoo duushay ee dalkooda xooga ku qabsatay ereybixin xun ayeey ku dhejiyeen waxeeyna ku magacaabeen

gumeeyste = gun kadhige bulsho dhamaantood gob eheeyd.(Balqiiso 3000 sano kahor sidaas ayeey noosheegtay)

Carabtii marka ladul degay waxeey ku magacaabeen Isticmaar = ninkii noogu yimid in oow dhulkeena noodhiso ilbaxnimo nagaarsiiyo.(ilaa hada Cilmaaniyiinta Carbeed waxeey jecelyihiin in Isticmaar u yimaado)

Dunidan aan ku noolnahay Dumarka waa la amaanaa.

Magaalo marka eey barwaaqo dhextaalo dhismaheeda sare ukaco amaan ayaa loo tiriyaa , sidoo kale marka cadaw aad ka xoreeyso dhulkaada waa la amaanaa

siiba marka oow kudhaafo gumeeyste .

Somalida qeeyb kamid ah marka eey xoroobeen waxaa lagu xasuustaa ereyadan qiimiga badan

---

nolol ugub ah aaranaa aleeylehee helnee Eebboow mahadaa

niyad udugleh sida Ubaxa aleeylehe helnee Eebboow mahadaa.

aayahii danteena la abaabulyee Alla magane la uruuriyee

***

Umad walaal`ah  wada walaal ah . wada`arimiso.

shaqaala ordi oo hoowl u ordi.

**

awoodeena oo runa aleeylehe helnee Eebboow mahadaa

Adimadeena oon maalno yaan ku oon baxnee Eebboow mahadaa.

inaan isku filnaanay la aqoon sayeey, Alla magane la ogaayayeey .

**

Walaal eedla iyo cadawba kala aragnayeey Eebboow mahadaa.

ujeedadeena Uunkaleento ugama cabsanee Eebboow mahadaa.

baryada iyo amaahda Alla magane iska diidnayee (1)

Xaliimo Khaliif magool , Ruuxdeeda Rabi haka raali noqdee iyada ayaan kasoo qaadanay ereyadaas.

*(1)*baryada labaryo bini aadanka .

1000 sano kahor ganacsigii Gobolada udhexeeyay!

waa loo baahan yahay qof cilmi baaris ku sameeyso qaabkii Somalida dhexdooda u kala ganacsan jireen

Xamar 1000 sano kahor Afgooye ayaa Qudaarta looga keeni jiray waayo gaadiidka lagu safrayo socodkiisa aad boow ugaabnaay macquul ma ahan in

Qudaar laga keenay Jowhar lagu isticmaali jiray Muqdisho.

Suufka & Galeeyda waa suuragal.

Somalida waxaad moodaa inbadan in eey isku mashquuliyeen ganacsigii eey dibada la lahaayeen lkn aanan baaritaan dhab ah lagu sameeynin

ganacsiga gobolada ka dhaxeeyn jiray .

#Taariiqda abaaraha Afrika.(MASAR+ Somali)

1950kii taliskii gumeestaha waxaan ku tuhunay in isaga ka masuul yahay abaaraha wadanka ku habsaday.

1960....1970 kii waxaan dhahnay Alloow nadhaafi maamulka maanta jiro, ducadeena Eebbe waa ajiibay waxaan ku eedeeynay wax qabad la`aan . abaarta iyada ayaa kamasuul ah ayaan dhahnay.

1970.....1990 maamulkii jiray wax aan ureebanay majirin , Moowloow namooti midkaan , abaarta isaga kahor maba jirin sidaas ayaan sacabada kor ugu taagnay membarka waan ka habaarnay masraxa iyo maqaayada shaaha meel walba waan kasheegnay Rabi waa nadhaafiyay .

Shacabka Somali weli lama qabsan cimilada oow ku noolyahayay , Tignoolajiyada eey heestaan mid tayadeeda sareeyso ma ahan mana aboodo in eey kasoo waranto Hogosha Roobka inta eeyan ku hoorin Beeraha , daruurta biyaha eeysido

heerka eey la egyihiin 500 litir miyaa mise waa 1 milyan oo foosto?

---

shacabkeena waxeey caro kala dul dhacaan cidii maalintaas Villada dhex fadhido

waxeey isoo xusuusiyay dhaqankii fircoon lkn isaga oo dhalan rogan ayuu Somali dhex yaal .

fircoon marka eey kudhacday abaar waxoow dusha ka saaray Nabi Muuse iyo muslimiinta .

Somali marka eey abaar ku dhacdo waxeey eeda saaraan xukuumada maalintaas jirto .

Yurub dhaqan waxeey caan ku tahay

hadii shaqo la`aan dhacdo in eeda lasaaro qaxootiga wadanka soo magan galay ,Yurub dhibka ugu badan waa shaqo la` aan .

xukuumada waxa lagu canaanto waa in eey hooy siisay qaxooti . zamankan cida ugu badan ee qaxooti noqoto waa Muslimiin .

قال النبي ﷺ : « كـاد الفقر أن يكـون كفراً »




HAYVANLARI
BOYAYALIM









" أيها الأمير ، إن دخولي عليك لم ينقص من قدرك ، ولكنه شرفني ! أصابتنا سنة أذابت الشحم ، وسنة أكلت اللحم ، بقوا جلدا وعظما ، وسنة دقت العظم ، ومعكم فضول أموال ، فإن كانت لله فنحن عباده ، فتصدقوا بها علينا، وإن كانت لنا فعلامَ تحبسوها عنا ؟ وإن كانت لكم فتصدقوا بها علينا ؟ فقال الخليفة : والله ما ترك هذا الغلام لواحدة لنا عذراً "

---

taasi waxeey eheeyd ereyadii wiilka faqiirka ahaa ee looxilsaaray in oow Amiirka

kudhiira geliyo sidii bulshada wax loogu qaban lahaa

Ubad keenu waa kala yaqaan kii wax ugu yaale

kii yabooh iyo sadaqo Yurub usoo

heebshay.

***

Yoogada mugeed wax kasii yar kugu yabooheen , yaab waxaa leh Somali yiri yeelimaa nabada. (Max'ed Gacal) 1999

Ismaaciil Mire

"Guuguulayahow"

gabaygan Abwaanka waxuu kula hadlayaa Shinbirka Guuguulaha lagu maga caabo xili abaar daran eey dhacday ayuu isku deyayaa in uu sabarsiiyo kaligaa ma ahan ee dhibka waa lagula qabaa ee samir ayuu leeyahay

1) Guuguulayahoow haddaad gu'ga u ooyeysid
2) Haddaad mooddey keligaa in uu gubayo jiilaalku
4) Giddigood addoomaha waxaa gaadhey nabar weyne
5) Abaar gaag ma reebaa dhacdiyo Gaatamoo kale e
6) Gartaa ma aha keligaa indaad gaar u cabataaye
7) Guumeys cirro leh baan ahee waar aan ku gaadhsiiyo
9) Golihii ka kici waa raggii geydho hayn jiraye
16) Garanuugta iyo deeradii gaag yar baa hadhaye
19) Kama guuxo aargoonlihii geliga toomoode
20) Shabeelkii gabraar lagu idlee Giiro layn jiraye
21) Oo godadkii kama soo ciyaan gabanadiisiiye
25) Goggii subagga laga dhoobi jirey haatan gorofowye
26) Basaas baa timihii kala go'een gaaridii dumare
27) Gorgorkiyo dhurwaagii laftaad galayax moodaaye
32) Ayaxii geyiga joogi jirey guuto lagu saarye
36) Galowga iyo fiintii naf bay giida la hayaane
37) Gurxankiyo cabaadkiyo haddaad gooha demin weydo
38) Adigaaba lagu gaadayaa gooshkan dabadeede
39) Gaagaabso oo aamus yaan gaadh lagaa qabane

---

sh. C/qaadir Jeylaani ayaa kategay xigmadan hoosku qoran.

فتشت الأعمال كلها فما وجدت فيها أفضل من إطعام الطعام.

أود لو أن الدنيا بيدي فأطعمها الجياع .

**

لا تثق بمودة إنسان حتى ترى موقفه منك أيام الشدة .

**

لقمة في بطن جائع خير من بناء ألف جامع ... وخير ممن كسا الكعبة وألبسها البراقع ... وخير ممن قام لله راكع ... ... وخير ممن صام الدهر والحر واقع ... وإذا نزل الدقيق في بطن جائع له نور كنور الشمس ساطع ... فيـــــا بشرى لمن أطعم جائع



_____

Rabi Qolo walba dhib ugaar ah ayuu ku saliday

Yurub dhankeeda bari , waqooyi & koonfur dhan walba Baraf ayaa lagu saliday Ameerika waa lamid .

Afrika & Jaziirada carabta qorax ayaa lagu saliday , Qorax hadii aad maqashid qaleeyl iyo Oomane ayeey kadhigantahay (ka-walax tahay) abaaro ayaa wehliyo iyo roob la`aan.

Qaaradan Afrika Rabi waxoow usoo diray Nabi Yuusuf si oow ula dagaa lamo abaarta Masar. cilmigaas wax hormarin fiican usameeyay weli lama haayo qaaradan dadka ku nool weli weey kahurdaan sidii eey kaga gaashaaman la haayeen Biyo la`aanta iyo Roob yarida iyo abaaraha soo noqnoqday ee Afrikada in badan asiibay.

Qaarada Ameerika iyo Yurub waaba lala yaabaa abaarta waayo sanad Baraf lawaayo maba jiro waana roobka oow ku baxo Beeraha dhulkaas laga beerto

dhib kuma hayo roob la`aan lkn qaboow ayeey ka cawdeen qarash badan ayaa kaga baxo sidii loo heli lahaa Koronto guryaha lagu kuleeyliyo & Gawaarida Barafka dhulka looga xaaqo .[USA waxaa udheer duufaano iyo daadad .Aasiya waa lamid dhanka daadadka]

sidii loo gargaari lahaa hadii eey ka go`do Korontada xaafad la

degan yahay xiliga qaboobaha .

Qaarada Aasiya waxaa lagu saliday Dhulgariir sida Jabaan, Eraan , Hindiya, Pakistaan Indoniisiya. 20 sano ka hor magaalooyin kii hantida lagu dhisay laga yaabee in maanta dhulka lala simo wadankana ku waayo halkaas

dad iyo hanti taasna waxba madhaanto dagaalka Nugliyeerka .

_____

Tariiqda fog ee abaaraha Qaarada Afrika

المقريزي





qeybahan soo socdo waxaan kaga hadli doonaa abaarihii lasoo

maray inta Islaamka jiray.المقريزي

wadaadka Kutubkiisa aan sooqaadanay waxuu abaarta kuwaayay gabadhii uu dhalay, abaar kadhacday Masar saa daraadeed waxoow kaqoray Buug aad uyar laguna soo koobay taariiqda abaaraha soo maray wadanka Masar.

masar halka biyaha uga yimaadiin waa Webiga Niil kaas oo kayimaado wadanka xabashida waxaa meesha kamuuqdo in roobabkii kuyaraadeen wadanka Xabashida. xigmada waxeey tahay "deriskaada hadii eey duumo haleesho laga yaabee in oow kugu daarto, ka daweey ama udiyaarnoqo in oow ku qaadsiiyo" miizaanka aan waxkumiizaami doono marka aan kahadleeyno abaarihii kadhici jiray Somaliya waxaan kasoo qaadaneeynaa dalka Masar waayo hadii halkaas eey kadhacday abaar taas waxeey kadhigan tahay in dhulka Somalida iyo xabashida eey soo martay qorax daran

maadaama eeysan qorneeyn taariiq latixraaci karo kuna saabsan dhanka taariiqaha abaaraha , maadaama eey aad uyaryihiin kutubo eey qoreen dadka xabashida hadii eey jiraana aan lafaafin waxaan ku qasbanahay in aan in badan kashee keeyno dalka masar waayo isaga ayaa ah halkii lagu keeydiyay Dalal badan taariiqdooda, somalida waa in eey aad uqadariyaan qalinka reer masar waayo 1000 sano taariiq kusiman ayeey wax naga qorayeen ujeedo siyaasadeen iyada oon laga leheeyn

---

Maqriizi [كتاب إغاثة الأمة بكشف الغمة

Miqriizi kutubkiisan qeybaha ugu horeeyo waxoow kaga hadlay abaarihii dhicijiray zamankii hore waxii kahoreeyay Nabi Nuux iyo wixii kadanbeeyay sida tii dhacday zamankii fircoon . taariiqdaas fog ee oow kahadlay masoo qaadan

doono, kaliya waxaan isdultaagi doonaa xiligii Islaamka xakumayay wadankaas abaarihii soo maray .

Dowladii reer Umaya

" غلاء فى زمن إمارة عبد الله بن عبد الملك بن مروان "

87.H. waxaa kadhacay sicir barar aad udaran waana kii ugu horeeyay ee dhacay inta eey xakumayeen muslimiinta.

Dowladii Ikhshiidiyiinta

" غلاء فى زمن إمارة أونوجور بن الإخشيد "

338.H. 341.H.

Webiga niile biyihii ayaa ku yaraaday , wax soo saarkii beeraha ayaa hoos udhacay waxaana kadhashay in Qamadiga qaali noqdo waana sheega ugu badan ee dalka laga quuto (

galeeyda halka eey ka isticmaalaan Somalida Masar Qamadiga ayeey ka jecel

yihiin galeyda)

iyadoo eey jirto abaartaas daran waxaa lagaaray xiligii ramadaanka bulshadii oo markii horaba ku dhib qabtay sicirbararka ayaa waxaa uga sii daray ramadaankii oo lakala boobayo quudka waayo ruux walba waxuu doonayaa in oow keeyd kadhigto cunadii afurka iyo saxuurta.

[wadaada qaar ee membarka taagan badankood waxeey aad ugu mashquulaan fadliga bisha barakeeysan ee ramadaan lkn waxeey iska indha tiraan sicirka suuqa waxaad layaabeeysaa in aan marna laga hadlin burka iyo baastada & saliida ,bulshada lagu qaali-gareeynayo marka lagaaro ramadaanka waxaadba isleedahay iyaga ayaa ku faraxsan in nolosha sidaas noqoto . mise waxeeyba kazaahideen nolosha oo maba kawarqabaan waxa kasocdo suuqa?]

---

xiligii **Kaafuur al- ikhshiidi** ayeey dib usoo laabatay abaartii **352./354./356.H.**

xili abaar daran eey jirto ayuu dhintay Kaafuur al- ikshiidi ,

kadib geeridisiisa waxaa xigay dagaal ciidamada eey ku dagaa lameen magaalada .heer ladhacay suuqyadii magaalada , hanti badan oo shacabka leeyihiin dab ayaa laqabad siiyay .

[xaalada dalka oo sidaas ah abaarahaas isdaba jooga ah lasoo maray wax kaalmo ahna aan laga heleeynin carabtii deganeeyd ciraaq iyo suuriya warkooda daa kuwii Yaman 358H, ayaa lagaaray misna waxaa kafaa iideestay duruufta oow dalka kujiro shiicadii
ku sugneeyd Tuunis iyo Libya waxeeyna xoog ku qabsadeen dalka oo idil 250 sano ayeeyna katalinayeen , iyagana sida eey dalka ku qabsadeen si lamid ah ayaa soo martay abaaro isdaba joog ah iyo dagaalo dhex dooda ah sida eey uga faa iideesteen ayaana looga faa iideestay oo dowladooda waxaa burburiyay imaamkii SALAAXA DIIN AL AYUUBI . dib uga daalaco qoraaladii aan kaqornay Dowladii reer faadumo.]

Dowladii reer faadumo iyo sicirbarkii eey lakulantay

360H. ayeey soo galeen dalka lkn waxeey lakoowsadeen

abaaro daran oo lasoo maray wax hanti ah oo yaalay majirin

dalka masar maalintaas.

shacab gaajoon ayeey ahaayeen , duulaankii eey ku qabsadeen

dalka shacabkii markoodii horaba diifta kamuuqatay weey uga

siidartay oo abaar dabadheer ayeey ku noqotay heer shacabkii

eey duugi kari waayeeyn ruuxii kageeriyooda kafantii lagu aasi

lahaana wax leeska weeydiiyo halka laga keeni lahaa, kaaga darane eeysan jirin cid awoodi karto socod iyo itaal lagu qodo qabuuraha . dowladii shiicada eheeyd ee aan kasoo waranay waxeey isku dayday intii karaan keeda ah in eey maareeyso sicirbarka waxeeyna meel iskugu keentay ganacsatadii raashiinka, waxaana leesla meeldhigay in aan qaali lagu iibin quudtul daruuriga.

raashiin walba oo suuqa lakeeno hal meel oo lagu iibiyo suuqa dhexdiisa ayaa laga dhisay dowladana eey korjooge kanoqoto .[lkn taas waxba matarin oo abaar Eebe umadiisa ku saliday dowlad waxba kama qaban karto lkn weey uga sii dari kartaa waayo abaaraha qaar dowladaha ayaa gacantooda ku sameeyo si shacabka loogu ciqaabo. bal aqriso kutubka

(SANAACATUL JUUC).]

" غلاء في زمن الحاكم بأمر الله "

387H. waxaa soo biloowday abaarihii eey ku caanka eheeyd dalka masar Niilka ayaa biyaha ku yaraadeen .

[is xusuusin aafada eey leedahay abaaraha waxaa kamid ah in dumarkii dhoowrsanaa dariiqyada jirkooda ku iibiyaan qisada nuucaas ah waxeey ku qoran tahay axaadiista nabiga .qisadii 3 nin ee godka kudumay, waatii gabar hada kahor oow guur kadamcay lkn diiday waagaas duruuf mar eey ku dhacday oow dariiqa kahelay isaga oo dhahayo lacag ayaan ku siinayaa ee sidaan doono iiyeel oo udhigato iga ogoloow dhileeysi ,wiilka sidaas dhahayana oow yahay kii dad ugu sokeeyay sida xadiiska ku qoran. sax iyo qalad cidii xadiiska qortay ayaan udeeynay (#B.) lkn waxaa meesha kamuuqato in abaar dhacday darteed wiilkaas udamcay dumarkii dhoowrsanaa. damiir xumadiisana oow garan waayay waa gabar duruuf kamuuqato ee dadnimo iska raadi dhoowrka dirham kusadaqeeyso. waloow dhamaadka xadiiska oow kusheegay in oowsan ka macsiyeeysan ee Rabi dartiis iskaga daayay .]

395H. waxaa guray webigii Niil biya la aanta waxaa xigtay sicirbarar oo beerihii dalag waa laga waayay 397H, ayeey socotay sicirbarkaas , sarifkii ayaa cirka isku shareeray leesku bedeli jiray dirhamka iyo diinaarka lkn dowlada ayaa suuqa kusoo daadisay keeydkii eey leheeyd si hoos loogu dhigo qiimaha sarifka .(baraarujin: xiligaas dowlad walba buuryar oo dahab ah ayeey qasriga dhigan jirtay hadii dhibaato dhaco inta lajejebiyo (quruurax laga dhigo) ayaa suuqa lagu soo daadin jiray si loo isticmaalo waayo lacagta xiligaas la isticmaali jiray waxeey ka sameesneed Dahab)

الحاكم بأمر الله "

ninkaas magaciisa korkaaga muuqdo waxoow ahaa nin manaxe ah aad udhibaateeyay shacabka lkn marmarka qaar shacabka waa unaxariisan jiray waxaa lagu tilaami karaa xajaajkii shiicada.

390H. markii eey dhacday abaar waxoow iskugu yeeray ganacsatadii raashiinka waxoowna ku amray in eey laba arin kaladoortaan

1- in eey dowlada siiyaan amaah dhanka raashiinka ah lacagtana eey buugaag kuqortaan, waxaa amaahda lagudi doonaa marka laga baxo abaarta qiima leesla meeldhigayna dowlada kula wareegto wixii raashiin ah ee dowlada la deeyminayo.

2- in eeysan waxba iibin ilaa eey suuqa kasoo geleeyso badeeco kale oo cusub .

ganacsatadii waxeey ka ogolaadeen in eey dowlada amaahiyaan waxa eey ubaahan tahay . sidaas ayeeyna sicirkii kuraqiisay waayo dowlada waxeey biil siisaa askarta iyo waziirada iyo qalinleeyda iyo dadka masaakiinta ah , kooxdaas wax iibsigooda suuqa hadii oow hoos udhaco waxaa kadhalan karto in raashiinka raqiiso waayo beec leesku eryo maba jiro raashiin meel walba ayuu dhooban yahay isaga oo deeyn ah ama

dowlada kugu siineyso mucaawino ahaan .

_____

"غلاء فى زمن الخليفة المستنصر" (1)

444./447.H.

sadax sano oo xiriir ah ayeey socotay waxeeyna kusoo aaday xili dowlada eeysan waxba heeynin oo keeyd meel uyiilal majirin

[sida aan kor kusoo marnay waatii eey dowlada ganacsatada ku amartay in dowlada amaah lasiiyo taas waxeey kamarqaati-kaceysaa in dowladii jeebkeeda haawanayo. waxaa xusid mudan ninkii lagu magacaabi jiray Alxaakim bi amri laah in oow ahaa nin aad u arxan daran shacabka hantidooda kucayaari jiray weliba magaalooyin dad shacab ah deganaayeen ayuu deb qabadsiiyay taasna waxeey daliil utahay in dowlada eeysan kala jecleen shacabka in oow noolaado iyo in eey gaajo udhamaadaan.

shacabka hadii oow ceertoobo dowladii dhankeeda lagu ceeyman lahaa eeysan waxba dhaamin shacabka taas waxeey lamacna tahay 2 qaawan isma qaado.]

"غلاء فى زمن الخليفة المستنصر"

(2)

Gaajadii bisadaha iyo Eeyda lacunay

457.H.

7 sano aan kala joogsi leheeyn ayaa timid

dowlada waa tii aan kor kusoo xusnay kursiga isaga ayaa weli kufadhiyay lkn waxoow ahaa nin dadaalayo waloow ladhaxalsiiyay dowlad qasnadeeda marantahay eeyna ku ciyaarayaan waziiro aan midna kursiga kuwaarin waayo waxaa lasheegaa in oow ahaa mid shaqsiyadiisa liidato.

(ulama jeedno ninka aadka unaxariista badan ee waxaan ulajeednaa ninka aan iska qaban-karin ruuxa aan uqalmin booska loodhiibay.

aan kasoo bixi karin masuuliyadiisa sida waziir dharaarta kursiga kufadhiyo hadana eey ka muuqato qaadiro indho xalay oodhan qayilsanaa goobta shaqada hurdo usoo doontay, aan lacanaann karin waayo qooska talada hayo ayuu kadhashay waa dhaxal Aabahiis.

nina dhaxal kiisa laguma ciil-ciilo)

وأكلت الكلاب والقطط حتى قلت الكلاب ، فبيع
كلب ليـؤكل بخمسة دنانير ، وتزايد الحال حتى أكل الناس بعضهم بعضًا .

98/ إغاثة الأمة بكشف الغمة - المقريزي.

[shqa . hadalkaas kabad-badin miyeey katahay mise waa qiso jirto oo run ah koleey sidaas kor kaaga muuqato ayaa kuqoran kutubka.]

Shqa. hadal kiisa isaga oo siiwato waxoow leeyahay gaajadaas Eeyda lalacunay waxaa xigay cudur safmareen ah .


dadkii waxeey gaareen in aan lasafri karin cabsi laga qabo dad in oow kucuno ama dugaag baahan hadii safar lagelayo waa in leesku raacaa horin. koox hadii eeysan kula socan halis ayeey kujirtaa naftaada .

. وكانت نساء القصور تخرجن ناشرات شعورهن تصحن : «الجوع ! الجوع ! » ، تردن المسير إلى العراق ، فتسقطن عند المصلى ، وتمتن جوعًا .

Dowladii waxwalba oo keeyd u ahaa weey iibisay

Dhar qaali ah jijiman kii dumarka uxirnaa looma daayin ee waalaga soo furay oo suuqa ayaa lakeenay askartii ayaa hubkooda iibisay dowlad waxeey noqotay aan laga heeybeeysan

.



520/550.H

waxoow ahaa madaxweeynihii ugu danbeeyay Dowladii Reer Faadumo ,qisooyinka aan kor kusoo marnay mid lamid ah ayuu lakulmay intii oow xakunka hayay


---

zamankii dowladii ayuubiyiinta Salaaxadiin al ayuubi
590.H

abaarta sida caadada eheeyd waxeey kadhalatay Niilka oo guray .
waxaa ugu cajiibadan in lawaayay xoolihii ladhaqan jiray waayo abaarta ayaa looga soobaxay 1neef oo lo`ah
hadii suuqa lakeeno qaali dartiis cid iibsan karto majirin .
webiga marka oow biyo keenay cid beerihii tacabto ayaa lawaayay waayo dadkii weey dabar go`een ciidamadii ayaa

caruurtooda laguuray si eey beero utacbadaan .

(wiilashii oow dhalay Salaaxadiin wax sidaas ah madhaamin kuwii dowladii reer faadumo marka runta loo hadlo, oo waxeey ahaayeen doqon ku dagaalanto kursiga taas oo kadhalatay in hantida shacabka lagu ciyaaro waayo dhul lagu dagaalamayo dhaqaale kuma hagaago)



696.H.

gobol lagu magacaabo Barqa oo katirsan Liibya ayaa waxaa haleeshay roob la aan waxeeyna usoo qaxeen dhanka Masar 30,000 ayaa lagu qiyaasay bulshada dhanka Masar usoo qaxday lkn badankood waxeey ku dhinteen intii wadada lagu soo jiray waayo biyo majirin ceelashii waa hore ayeey gureen roobna dhoowrsano dhibicdiisa dhulka kuma soo di`in.

dalkii Masar ee loo sooqaxayna abaar ayaa ka dilaacday oo Niilkii ayaa guray Dowladaha diriska ah sida Falastiin wax roob ah kama di`in .

zamankaas dowlad dadka saacido oo awood leh majirin

waloow eey dowladii reer ayuub dhulbadan xakumeeysay .

---

lagayaabee in aad ku caajisnay sida aan udul taagneeyn Masar , waa su`aale maxaa laga qoray xiligaasWadanka YAMAN oo nagu dhegan?

وأقحطت مكة ، فبلغ أردب القمح بها إلى تسعمائة درهم ، والشعير إلى سبعمائة ، فرحل أهلها حتى لم يبق بها إلا اليسير من الناس . ونزحت سكان قرى الحجاز ، وعدم القوت ببلاد اليمن واشتد الوباء ، فباعوا أولادهم فى شراء القوت ، وفروا إلى نحو حَلْى بنى

Sacuudiga waa laga soo qaxay oo dhanka Yaman ayeey usoo carareen dadkii lkn xaalka labada dal waxba isma dhaamin . abaarta dhacday waxaa lagu tilmaamay in caruurta lakala iibsaday.

[majecli in aan sooraro hadalada insaaniyada kafog lkn inta aan kasoo tegay ee Buuga kuqoran ayaa kaxanuun badan.]

"غلاء فى زمن الملك الناصر محمد بن قلاوون "

736. H.

dhibka halkii ayuu kasii socday biyo la`aanta Niil ayaa jirtay .

775H.

Dibi Nabiga bishaaro kasido oo la arkay!

7 sano ayeey socotay abaartaas aan kasheekeeynay

waxaa lasheegaa nin ayaa waxoow deganaa wadanka Suuriya magaalada Dimishiq waxoow lahaa neef Dibi ah waxoow ukaxeeyay ceelka si oow usoo waraabiyo marka oow tegay ceelkii waxaa halkaas kula kulmay dad reer baadiyo ubadan oo ceelka usoo doontay biyo ninkii waxoow waraabiyay Dibigii lkn marka oow biyaha kadhergay Dibiga waa hadlay afcarbeed la fahmi karo ayuu ku hadlay isaga oo dhahayo "Alxadu lilaah abaar socotay 7 sano ayuu Eebbe Umadaan kusaliday, Nabiga ayaa Eebbe baryay oo kashafeeco dalbay Eebbe waa ka ajiibay

arinkaas Nabiga waxoow isoo amray in aan idin gaarsiiyo arinkaas, Nabiga waxaan weey diiyay Umadaada sidee ayeey ku aamini doontaa hadal keeyga ? Nabiga waxoow iigu jawaabay xiliga aad lahadashid waad dhiman doontaa ". Dibigii sidii ayuu noqday Buur meesha udhaweeyd isaga oo kasii degayo ayuu halkaas ku dhintay.(Miqriizi meela badan ayuu sheekadaas kuqoray lkn macquul matahay in sidaas dhacdo ? jawaabta waxeey tahay haa weey dhici kartaa aaqiruzaman marka lagaaro Rabi waxoow dhulka kasoo saari doonaa daabad dadka lahadli doonto. maxaa diiday in Dibi laga hadalsiiyo? waatii oow lahadlay Nabi Aadan .)

---

7 sano kadib waxaa lahelay roob umada eey ku diirsatay daruurihii ayaa curteen duunyadii waxeey heleen doog eey coows ka daaqaan xoolihii candhadooda gurneeyd caano ayaa laga lisay midii aan weligeed curan weey curatay oo caano danbar ayaa laga lisay dadkii duruufta kamuuqatay duuftii weey katirantay damaashaad ayeey durbaano utumeen si eey umuujiyaan in eey kufarxeen nimcada Eebbe ugu bedelay

dhibkii eey soo mareen.

(miyaadan arag caruurta inbadan marka eey oohin daasho caanaha hooyo marka eey siido waa iyagii iska iloobay oo ciyaar udhaqaaqo. bulsho caruur weeynaatay waxba madhaanto hadii dhab loo fiirsado dhaqankooda)

---

halkaas ayaan ku joojinay Taariiqda abaaraha dhanka Carabta , ujeedka aan usoo bandhignay wuxuu ahaa in la dareemo deriska Somalida dhibka kudhacay, in Awoowa yaasheen iyana eey la kulmeen dhibkaas mid lamid ah.

Qabri nin galay miyaa kuu waramaayo haduusan Qoraal kaaga tegin .

Aabayaashii Somalida waaba iyagoo naleh waxa kudhacay

Masar inagana weey nagu dheceen.

DHAMAAD

[10/10/2015 uk]

Dhanbaalkii Hadraawi soodiray dhex baa loo fariistay.

[~25/3.]Abwaan Hadraawi ayaa hada kahor dhanbaal usoo diray Somalida si eey Alla bari uqabtaan roobdoon Looxaanta madaxa lala saarto gees walbana ugadhaco.

سورة نوح

اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ إِنَّهُ كَانَ غَفَّارًا (10) يُرْسِلِ السَّمَاءَ عَلَيْكُمْ مِدْرَارًا (11) وَيُمْدِدْكُمْ بِأَمْوَالٍ وَبَنِينَ وَيَجْعَلْ لَكُمْ جَنَّاتٍ وَيَجْعَلْ لَكُمْ أَنْهَارًا (12)

sidan ayaana kuqorneeyd dhanbaalkii Abwaanka.

Cirku waa engegan yahay

Naxariisi kama iman

Dhulku waa arradan yahay

Oogadiisu damac ma leh

Waa abaar dad qalata ah

Waa sabaan la adhax jabay

Ma aloosna geedkii

_____

dhanbaalkii Somalida inta uusan soo gaarin kahor waxaa dhex ufariistay [**Abwaan Maxamud Sulub Warabe**] waxuuna safarkii kala haray Warqadii dhanbaalka ku qornaa isagoo dhahayo Somali in loo Alla baryo cid iga mudan ayaan jirin maanta

waxuuna soo tiriyay gabaygii ducada ahaa ee Baryo Saatir ,waaba kan nuxurka gabaygaas.

 # Gabaygii -> Baryo Saatir <

Eebboow Sir iyo Caadba waad noola socotaaye

Amuur sabana badan uunkayaga guudka lagasaaray

oo seexan waa nagu ridaan Caawa sarayaaye

sancadeeda adigaa hayoo sina uwaayeeyne

waanu kaasugeeynaa waxadnagaga saareeso

Eebboow sabool nimadu waa saancad iyo hooge

Somaliduna waa sahan sadoo keenaduu suraye

Eebboow sed -deeqo kufilan adigu maad siisid

inkastaa sedkaa weeyn natiri Suunka ka adkeesta

inkastaa natiri samuhu waa in aad kasoontaale

inkastaa natiri waa sunee Saabka ka ogaada

qofki aadan siin igawalee in aan cidi sabooreeynoo

inkastuu samaan wado majiro ruux sidiqayaaye

Somaliduna weey wada qabtaa Boogtan aan saraye

sawabtana waxa keenay waan sii sawirayaaye

Umaduba Hunguri sooman beey toos usidataayo

waxeey magaca kugu siinayaan waa Sanaatida `oo

hadii oow sibraarkoodu qoyin saaqid baa tahayeee

Sarkaal koodu waa maalintaas keey kasaxayaanoo

had-ba kii sar dheer fuulo woow sacab garaacaano

soowd kuu yiraahdaba horaa looga saxayaaye

Eebboow saldanadaan ninkii seegay laga yaacyoo

Sacab timaleh weeyaan ineey Gacan kusiiyaanoo

sancadeeda adigaa hayoo sina uwaayeeyne waanu kaa

sugeeynaa waxaad nagaga saareeyso

..

Saqda dhexe dartaa baan Gacmaha sare utaagaaye

Salaadaada woow taaganahay Saacado adage.

Ducada noocaan ah mid nagu cusub ma ahan waxeey ku qoran tahay

Quraanka Suurada Maryama

qaabka Nabi Zakariye oow ku bilaabay Ducada

sidaas oo kale ayuu Abwaanka Ducada uqaab dhigay.

Nabi Muuse markii oow Rabi ka baryay in walaal kiis laga dhigo Nabi sidaan oo kale ayuu uduceestay.

Nabi Muxamad ducada oow ku duceestay maalintii eey xaalada kaxumaatay

sidaan oo kale beey eheeyd .

_____

dhanbaalkii hore in dhex loo fariistay markii la ogaaday dhanbaal kale ayaa laga soodiray **Qabri dahar** .

Ismaaciil Mire ayaana soo diray

) Guuguula-yahoow haddaad gu'ga u ooyeysid

) Haddaad mooddey keligaa in uu gubayo jiilaalku.



fariintaas maldahan markii laga helay Abwaanka, bulshadii Somaliyeed geeswalba hajoogeene sacabada ayeey sare

utaageen ,Barya Saatir Eebboow, waan basaasnay Eebboow .

gedigood sidaas beey lahaayeen.

[qisada waa jacbur maancir ah ,lkn gabayada weey jiraan.]

_____

_____



QARNIGII TEGAY IYO TAARIIQDA SOOMAALIDA.

(~ 3/4/...QISO AAN KASOO XIGTAY XUSUUS

QORKEEYGA)

Bunkii Moowlaca Macalin Biimaaloow 1940.M.

qisadan waxaan uqeeybiyay 2 qeeybood.

waana qiso tooshka ku ifineeyso silaca eey ku noolaayeen bulshada Somaliyeed.

_____

qeebta 1-aad ee qisada.

yaraanteeydii waxaan usoo casha doonan jiray Moowlaca Macalin Biimaaloow kaasoo habeen walba dadka Masaakiinta ah casho ukarin jiray, cidii baahan si eey agtiisa casho uga soo doonato isna wixii tabartiisa ah ayuu masaakiinta ku sadaqeeysan jiray.

Hooyooyinka Somaliyeed waxaa dhaqan u ahaa in eey Siyaaro ukeenaan Sheeqa Sanadkiiba mar ama 3 jeer . qaaraan ayeey iska soo uruurin jireen kuna sadaqeeysan jireen Shiiqa . Hooyo walba weey dareentaa dhibta eey leedahay caruur aan waxba heeysan . Shiiqa Moowlaciisa waxuu lamid ahaa Kaam eey Bulshada kuwooda faqiirka ah wax kacunaan . sidii Nabiga uquudin jiray masaakiinta ayaa Moolaca Caruur badan eey kusoo hiran jireen.

لِلْفُقَرَاءِ الَّذِينَ أُحْصِرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ لَا يَسْتَطِيعُونَ ضَرْبًا فِي الْأَرْضِ يَحْسَبُهُمُ الْجَاهِلُ أَغْنِيَاءَ مِنَ التَّعَفُّفِ تَعْرِفُهُمْ بِسِيمَاهُمْ لَا يَسْأَلُونَ النَّاسَ إِلْحَافًا وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ اللَّهَ بِهِ عَلِيمٌ)

[Baqara.273]

Caruurta maalintii waxeey uqraab tagaan Suuqa . ninkii Baroodo iyo Muufo kasiiyo Maqaayada iyo qof sanuud usoo taagaba waa dharaar cad qof baahan iyo qof dherganba waa loo jeedaa lkn mugdi haduu jiro gabalkana dumay gumeeysina uu

dalka maamulo waxeey kadhigan tahay macluul haku disho.

hantidii Dalka lahaa ileen iyaga ayaa Maraakiib kusiirartay oo dalka iyaga ayaaba xaalufinayo .

sawirada aan kusiinayo waa nolosha Xamar taalay waxba ha igu canaanan muu Hargeeysa soo hadal qaado.

ogoow nolosha Shacabka siiba dhanka faqriga waxba isma dhaamin Hargeeysa & Xamar .

Gumeeysi gacan naxariis badan nooma fidin ee faqri ayaan udhimanay.weliba faqri gacan kurimis ah ladoonayay in Bulshada lagu halaago.

waa gaajo gacan shisheeyay eey curisay ee mid Cirka kasoo degtay maba ahan .

yeeysan waxba kuu faanin kuwa gumeeysiga uu biilka siiyo ee Idaacada loofuray si eey ficiladii guracnaa eey ku kaceen Awoowa yaashood, maanka Ubadkeena uga masaxaan.

ujeedka qisadan maba ahan in aan qolo eeda dusha kasaaro

lkn waa in aan kusiiyo nolosha dhabta ah ee kajirtay Xamar 1940 kii.

_____

qeebta 2aad ee qisada.

waa galab arbaco qamiisi eey soo geleeyso sanadka waa 1940.

aniga oo usoo hoyaadayo halkii aan kaaga soo hadlay ayaan waxaan kordheer ka arkay Xer meel sii lugeeneeyso waxaan dareemay in eey usocdaan Siyaaro ama Sab hadba sidaa utaqaanid

waxaan go`aansaday in aan daba dhigto lkn dusha kalasocdo ileen aqoon nagama dhexeeyso lkn hal cadaw ayaan leenahay waana caloosha gaajoon wax lagu shubo malahelayaa ? .

Culimadii Xerta ahaa waxeey sii lugeeyaanba waxeey udhawaadeen guri aan qiyaasay in eey Sab kajirto

waan soo socod boobsiiyay oo waan kulugdarsaday oo waxaan

iska dhigay sida in aan iyaga lasocdoo kale.

hadii aanan sidaas yeelin Albaabka ayaa leeygu reebayaa .

waan usheegay nolosha xun ee aan ku noolahay asxaan iifala ee Albaabka aan idinku dhaafo ayaan dhahay, iyana weey iga aqbaleen dalabkaas hunguri doonka ah .

Cimaamadii culimo-nimo ayeey maalintaas ii huwiyeen .

waan gudubnay Albaabkii oo gudaha ayaan ugalay Aqalkii Amuurta kadheceeysay .

lkn sidii aan filayay manoqon oo waaba culimo soo deg-degtay oo Quraan aqris ayaa loogu yeeray.

si qaas ah ayaa loo casuumay oo Subac in eey aqriyaan ayaa ladoonayaa.

maalinta Qamiista ah Subacaas ayaa la aqrinayaa maalinta Jimcaha waa maalintii Siyaarada ladhigidoono.

dhibka waxuu iiga yimid Quraanka nin dhameeyay ma ihi oo Jus-Cama maba dhaafin oo qabyo ayuu iimarayaa Quraanka lkn

subaca haduu soogaaro jus-Cama waan ka qeeyb geli karaa.

24 saac ayaa ladoonayaa in aan sii joogo Gurigii Sabta kadhici leheeyd .

waxaan degay qorshe ah in aan meesha qaadum kasii noqdo oo Culimadii ayaan shaaha ugeeyaa Biyaha ukeenaa

Daango(Salool/ baalcad) hadii ladubo ninka loosoo dhiibo waaba aniga, Jikada iyo Culimada ayaanba udhexeeyaa, qofkii i arko waxuuba moodaa wiil reerka kamakid ah .

fariid nimadeeyda Hooyooyinka waxeeyba moodaan in aan lasocdo Culimada , guri siyaaro kajirto waa guri martida lagu soo dhaweeyo. yaatahay, yaana lasocotay meeshaas maba taalo.

Subicii Albaqra joogay waxuu soogaaray Jus-Cama .

Culimadii weey ii yeereen oo waxeey iisheegeen in Culimada lasiin doono Saabuun .

(Saabuun= ereybixin maldahan loona adeegsado lacagta lasiiyo culimada quraanka aqrisay)

safka Subaca ayaan kusoo biiray waxaad imoodaa Kabiir 4 jeer Quraanka naqtiimiyay. Jus- Cama sida aan uga adkahay culimada weey ila yaabtay.

Maalintii Jimcah, Quraacdii Siyaarada bal aan kaaga waramo qaabkii loo adeegay.

Bun & Canbuulo ayaan ugeeynay culimada

waxaa xigay Beer iyo Rooti iyo Shaah.

waxaa iigu qosol badnaa wiil kasoo qeeyb galay Siyaarada macawiista ayuu fidsaday . Buumo ayuu isku reebay Macawiistii ayuu kugediyay Saxan Canbuulo ah Macsaradii iyadoo kadifqeeyso ayuu Albaabka kalasii baxay .

Duhurtii ayuu soo laabtay waxaan weeydiiyay halka uu geeyay Canbuuladii isna waxuu iisheegay in uu dhexda kadhigay Saaxiibadiis kuwaasoo kamaqnaa Siyaarada.

wejiyadooda ayuuba itusay oo Qadada ayeeyba usoo raaceen .

_____

bal aan kaaga qisoodo qaabkii eey udhacday Duhurkii Qado leeskugu yimid .

dhoowr neef oo IDO ah ayaa qalan .

Neef Geel ah ayaa goowracan.

Saxan Bariis ah ayaan dhexda soo dhiganay aniga iyo saaxiibadeey.Nabiga(CSW) Hilibka Garab ayuu ugu jeclaa Saxanka waxaa dulsaaran Garab.

xili gaajo daran eey jirto ayaa lamarayaa waaba xiligii GUU-GUULAHA.

markii aan cunay Gabarkii ayaan raadinay Madaxii Wanka.

Maraq ayaa nalookeenay waxaana lasocday Kirishoow mirish .

Beer & Kili ladubay laguna shiilay Cadiin, Saxan eey kabuuxaan ayaa nalasoo agdhigay.

meel aan iga fogeeyn ayaan uga jeeday Saxan uu kabuuxo Hilib. feer Hilib ku dheganyahay ka fujinteeda waxba haku

mashquuline laace soo jiid Saxankaas nimcada dul saaran tahay ayaa dhegaheeyga kusoo dheceen.

anigoo ku mashquulsan soojiidista Saxankaas Hilibka kabuuxay ayaa Saxan shidni ah nalasoo agdhigay , mar aan kaligeey isla sheekeey-sanayay maskaxda ayaa iweeydiisay, maanta wax meesha kamaqan miyaad ogtahay ?.

cuntada ciil looqabo ayaa looga dhergaa lkn sahay maleh oo saakayba waad kabaahan-tahay .

Hilibkii Saxanka saarnaa waa uu sii dhamaanayaa lkn Hilibka qeeybdhan ayaa aasan ee Bariiska Hilib halaga dhex baaro ayaan maqlay.

Wadaad agteeyda fadhiyay ayaa noo sheegay in eey aasantahay nimcada Saxanka dulsaaran mid kasii badan . Hilbo ayaa Bariiska lagu hoosqariyay ee gunta hoose Saxanka nimcada lagu sheegay gacan halagu weeraro.

Bariiska oo kulul ayaan faraha hoos ugeliyay misane hadalka

waaba xaqiiq halkii ayaa weerar kuqaadnay.

Saxankii Bariiska kabuuxay waa uu sii dhamaanayaa lkn waxaa naloosheegay in eey jirto jug Bariis ah iyo Hilib wada socdo , markaas ayaan salka dhulka dhignay oo Suumanka ufuranay si caloosha nafis uhesho.

gurigii Siyaarada kajirtay ayaan kasoo baxnay inagoo aad moodid Rati hayin ah oo haamo culus sido socodka gaabiyay si uusan hog ugu dhicin .

الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَآمَنَهُمْ مِنْ خَوْفٍ

[Qureeysh.4]

Hooyooyinka ayaan soo maca-salaameeyay lkn waxeey ii sheegeen in eey jirto Abaay-abaay madax shub waanba iska jeclaa in aan sii joogo meeshaas qeeyrka kasocdo lkn cabsi ayaa jirtay oo ah hadii eey kaatagaan Culimada aad lasocotay, caruur facaa ah ayaa dhexda inta eey kugu hesho ayeey feer kaala daalayaan. xaafadeena maxaad kasoo doontay yaanan laguu


ciqaabin ayaa niyada iga gashay .

_____

Culimadii raali gelin ayaa loo soo jeediyay

"waa leeydin soo dhibay ee raali ahaada . sidaas waxaa dhahayay Odaygii Siyaarada nagu casuumay .Culimadii ayaa ugu jawaabtay sidaas weligaaba noosoo dhib. nimco ayaad naga dherjisay adiga iyo inta aad jeceshahayba Janada Eebe haku casuumo"

galabtaas aan sida wacan udhergay Sawirr aad uqurux badan ayaan lagalay Saxiibadeey xusuus ahaan ayaan ukeeydiyay hoos ka eeg Sawirka.



Marti sama falkeedaay

[gabay]

Sooryaa la hurayaa

Safar baa la furayaa

Sumallaa la qalayaa

Xididkiyo sokeeyaha

Laga seexan maayee

Salliyada xariirta ah

Socotada u kala roga.

Sarar iyo leg iyo badhi

Kee baan ku siiyaa

Sacabkaagu qaadaa?

Iimaan sed weeyee

mid haddaad saluugtana

saddexdaba bal iga hoo.

[Aabihii Xigmada Abwaan Hadraawi]

[Afeef iyo ararr: Qisadaas waxeey mudantahay in lagu daro qaamuuska keeydka taariiqda Somalida waayo qisada waxeey sawirr ka-bixineeysaa silicii lagu noolaa.waxeey tilmaan kaasiisay qaabka loo dhaqmo Xus & Siyaaro marka leesugu yimaado.waxeey ku siisay sawirrka dhabta ah ee Suufiyada , sida eey Bulshada taagta-daran usoo garab qabatay xili loo baahnaa kaalmadooda.

waxeey kaaga warantay halgankii Hooyooyinka. caruurtooda hadii eey kusoo dadaaleen caruurta aan cidna umaqneen Hooyooyin aan halmaamin ayaa jiro.

wax ku sadaqeestay Xarumaha agoonta iyo halka masaakiinta laga quudiyo.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آَمَنُوا أَنْفِقُوا مِمَّا رَزَقْنَاكُمْ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ يَوْمٌ لَا بَيْعٌ فِيهِ وَلَا خُلَّةٌ وَلَا شَفَاعَةٌ

[Baqara.254]

wiilasha Sawirrkooda aad aragtay qisada ayeey jileen lkn qisada waa qiyaali.

Dadka qaar hadii eey Qalin uqaateen in eey in badan kafaaloodaan Raga iyo Dumarka bulshada dhexdooda magaca iyo qadarinta kudhex leh .weey mudan yihiin in wax laga qoro bulshada sida eey uga qeeyb qaadatay samati bixinta bulshada tabaaleeysan weeyna mudan yihiin in loo qoro maqaal mahad naq ah . waad ku mahad santihiin gacanta hagar la aaneed ee

aad ufidiseen walaaladiina baahan weliba xili loo baahnaa kaalmada dhankiina katimaado, waayo walaalka marka uu wax kusiiyo waxuu kutusay in uusan ku iloowbin haduu kabadan hayana kaama uusan hagradeen .

<<<DHAMAAD>>>

---

gabaygii CARIISH.



CARIISH

Gabayada somalida weey qeeyba badan yihiin waxeeyna uqeeybsamaan .

-gabay dagaal(colaadkicin)

-gabay shaqo

-gabay dhalasho

-gabay amaan ah

-gabay ciyaareed

-gabay calaacal/ guubaabo.

-gabay Allabari , duco Eebe

_____

qisaduu xanbaarsan yahay gabayga oo kooban bal aan kuusoo gudbiyo ,
nin danyar ah ayaa waxoow degenaa Xamar waxoow kudhexnoolaa qol yar oo ciriiri ah, waana CARIISH kaagadarane waxaa ujoogto 6 caruur ah iyo hooyadood, dhamaantood waxeey dhexseexdaan qolkaas yar , lagayaabee in saqdhexe mid xanuunsan soo kaco midkalana oow lasoo tooso qaraw halka midkale isagana sariirta kasoo toosay kaadi darteed ,
waxaa kuudheer qolka hadii oow roob yimaado docda ayuu daadka kasoo galayaa oo biyaha iskama celin karo , maalintana qoraxda kuudheertahay waa qol aan lashamiinteeyin waa bacaad marka aad dhexseexato dhuudhi faraha kaagelayo(kud-kude iyo dhuudhi waa cayayaanka aqalada galo)
Cariiska iyaga malahan kiro ayeey ugu jiraan oo bil walba albaabka ayaa lagu soo garaacayaa bixiya lacagta ama kaguura ayaa laleeyahay. kaagadarane halka oow kuyaalo tubo biyo laga dhaansado maleh waa gaari dameer in biyaha kuushubo, ninkii iskalahaa ma ogola in oow

qarash geliyo guriga si oow udayactiro.
dhamaadka qisada waxoow kusoo qatimay duco baryo Eebe in oow dhibka kasaaro sidookale waaka xishooday in oow reer tolkiis u-tuugsi tago .hoos ka aqriso gabayga oo aan kasoo tagnay qeeybo badan maadaama oow dheeraa waan soo koobnay.

gabaygii CARIISH.

cariish kira, ah ciriiriga gudaha curadka gaabnaanta

marka canug seexdaba kankale iyo cabaadkiisa

cascasaanka waagiyo cishaha cuucda iyo yuuska

cosob hooyadoodiyo aniga wadaciyaarla`aanta

caruurtiinayaana idin arag ceeb kabaqadkeena

xamarmaleh cidla aan wadatagnee cirifyadheeraanta

ragbaa daarihiisii cadaa cidi ijaarteene

anigana camuud iyo habaas ciid galgaladkeeyga

cariishkaa bishiicuruta lacag cadalasaaraayo

weeygu ciriiriye kaalay igaceli cidina yeeleeynin

jiingadaha musmaarkuma mudnee danuciyaarkooda

cirfaha dumdumay iya kilyaha ciiduqubaneeyso cufee

meeldaloosha intaa calala doondoonka

gudahana carada tuuraniyo bacadka cuurnaanta cidiyaha

dhuudhiganagalay caabuqbararkooda

albaabkii abooraacunaye cirifyareebkiisa.

---

cadceedyar hadii eeytimaad dhuxulcadaabeedka

curka diga`oongelin kuleeyl dibugasoociirka habeenkiina

ceergaabo iyo cidibishiiqmoodka

duruuruhu hadii eey curtaan caawaseedoranta calcalyada

iyoxareed calasdhexjiifkeena

cadkoow magaalada ugayaal ceeliyobiyola`aanta

cankabuudkan caarada kalulan ciriiriga iyo boorka curi iyo

bisado isceeyrsanaa jirka caraaya

ayagoo ceeynkaa uuyahay wadacajaaiiba

hantidiisa cumarkiilahaa 100 ku-qaameeynta canaanta iyo isoodhaaftiyo ciyi caraawgiisa.

xaaskii cuqduuqaadiyo careeysiinta ileendumar sibeey ucaburtaan keey casilayaane

markeey aragtay ragshalay ceeyr ahaa maantana cubaan ah ifurta iyo caayda.

cariishkaan kirada ah igunaciyo coodka yaridaaye iga carartaye waan arkaa ciiradeeykicine

cashiirada iyo saaxiibadeey iicelcelila aanta , casabo iyo qabiilkii(qabiiltooyo) uwaco ilacuslaanteeda

---

mar hadii eey ceeynkaa eytahay xaajadeey culuse


Allahayoo adaa caadilohoo cudud lahoo weeyne

cilmigaada adigaa kudhigay caalamkoo idile

adigaana ceeyriyo kabaqin cuduriyo luufluufe

calaacalaha kii kuufidsada ceeb adaan orane majuusiga kucaasiyay yaad dahab ucuurtaaye dhircagaaran badahaa cartami buuro calooldheerle makhluuqaadka cadakaaleh ee kalana ceeynceeyn ah cerka iyo dhulkaa iiga filan caarifkaa tahaye CARIISHKAAN dhul iiga reey waan kucaabudiye.

[mustafe xaji cilmi/1980]



MOGADISHU: POPULATION BY HOUSE TYPES, 1953-1965

House Type	Number of Inhabitants		Percentage	
	1953	1965	1953	1965
Akal	8,269	12,957	13.0	13.8
Mudul	85	36	.1	.0
Arish	13,776	66,726	23.5	31.5
Baraca	27,373	53,468	48.4	27.2
Stone	9,923	38,498	15.0	27.5
Total	59,426	171,675	100.0	100.0

MOGADISHU: WATER AND ELECTRICITY CONNECTIONS, 1966 - BY HOUSE TYPE

Connections (in per cent)	Akal	Arish	Baraca	Stone	Total
Without water and electricity	100.0	97.8	83.0	49.5	81.0
With water only	.0	.2	.7	1.2	.6
With electricity only	.0	1.7	12.6	27.5	11.6
With water and electricity	.0	.3	3.7	21.8	.7
Total	100.0	100.0	100.0	100.0	100.0

(Somali Statistics (October, 1967): 3)





AQAL



MUDUL

<<DHAMAAD >>



AWKUUKUU+CABDALLA NUURADIIN+ODAY CABDULLE.

1975 Somalida jaamacada Carabta ayeey kubiirtay.

1976 wixii ka danbeeyay xaalka Somaaliya waa sii xumaanayay Hargeeysa haba ugu darnaato, Somalida weligoodba weey dibad jeclaayeen , Dalka Sacuudiga ayaa shaqooyin laga helay, halkaas ayaa leesku shubay oo shaqooyin loo doontay xiligaas.

1985-88 waxaa Sacuudiga ka biloowday RAAF , Somalida dhamaan wada saameeyay.

Jaamacada Carabta arinkaas aad beey uga xumaatay Sacuudiga

canaan ayaa loo soo jeediyay ah in Somalida walba uu kala sooco.

-hala tarxiilo Somalida lkn dadka Hargeeysa ka yimid il gaar ah halagu fiiriyo haloo naxariisto, taladaas ayeey soo jeediyeen Jaamacada Carabta.

Sacuudiga taladaas waa uu qaatay , qof Somali ah marka lasoo qabto wareeysi ayaa lala yeelanayaa Lahjadiisa ayaa la eegayaa halka oow kasoo jeedo ,haduu yahay reer Hargeeysa waa lasii deeynayaa, magaalooyinka kale ee aanan dhibaatada ka jirin haduu ka yimid dib ayaa Somali loogu soo tarxiilayaa.

Somalida intii Sacuudiga kusugneeyd Iskuul ayeey iska qoreen oo waxeey bilaabeen in eey bartaan Lahjada reer Hargeeysa .

haleeska doon-doono hana loo hadlo sida reer Hargeeysa ayeey noqotay.

AW-KUUKUU+CABDALLA NUURDIIN+ODAY CABDULLE.

dhamaantood waxeey ku sugnaayeen Sacuudiga waxeeyna kusoo biireen Iskuulka barashada Lahjada Reer Hargeeysa.

casharada halkaas laga baranjiray waxaa kamid ah .

-Ukun maxaa la dhahaa?(Beed)

-Koonbo maxaa ladhahaa ?(Daasad)

-Burjuko maxaa ladhahaa?(Girgire)

-Baaquli..... (madiibad)

-Sarfiyo.....(Digsi)

dee waxa weeyen gaw.

dee waxa weeyen naw iwm.

ayaa laga baran jiray halkaas.

CABDALLA NUURDIIN Cimaamad ayuu xirtay cigaalna maxada ayuu saartay, hada kabacdi aniga waa toloobay sidaas ogaada, Sacuudi dhalad ah ayaan ahay lasocda sidaas .

CABDALLA waaba ka guuray guriga eey wada deganaayeen

saaxiibadiis ,gabar Carbeed ayuu guursaday waxuu mooday in eey udhalatay Sacuudiga lkn waa ku qaldamay oo waxuu islahaa sharci ku qaadatid

mudo markuu qabay ayuu ogaaday in eey Suuriya kasoo haajirtay oo iyadaba soogalooti ku tahay Dalka.

CABDALLA isagoo baari ah ayuu bulshadiisa usoo laabtay.

Aduunka waa harka 2 badiisa gelin Hargeeysa nabad ayeey noqotay ,Xamar ayeey ka qasantay 1992...2010

Yurub & USA waxeey bilaabeen in eey Somalida kala soocaan sidii Sacuudiga sameeyay ayeey sameeyeen

imtixaan lahjad kudhisan ayeey dadka marsiiyeen

Reer Hargeeysa waxeey bilaabeen barashada

Lahjada Xamar, siiba (banaadiriga)

Aw-Kuukuu ayaa Iskuul u furay ileen waa nin silicii Sacuudiga oow kusoo maray og.

-Daango magaceed?(Baalcad/Salool yaan lagaa maqlin yaa,

Daango lee waaye yaahe.

-Baaquli magaciis? madiibad yaa lagaa maqlin yaahe.

-Kaluun.....Malaay.

-Kibis..... Muufo.

-Suuli magaceed? Musqul.

- afka jilci waxaas garanmaayo ku bedel (makasee,makasaayi

,waa kasaa)

garan mahayo waxaas yaa lagaa maqlin yaa, warka jilci yaa.

[qisadaas waa kaftan ku saabsan sida Somalida xaalkooda isku bedelo marwalba.waa qiso qiyaali ah .]

---

3 Oday oo deris ah

[~10/4]

1400 sano kahor 3 Oday ayaa meel wada deganaa

dhulka eey wada deganaayeen waa Somaliya

3 dii Oday waxeey inmudo ah eey deris ahaadaanba wexeey noqdeen dad saaxiibo ah isdabeecad fahamsan deris wanaag uu kadhexeeyo Odayaashii waxeey ogaadeen in eeysan meelna ukala guuri doonin eeysan noqon doonin garab ku rarato gelinba meel uguurto, waxeey ogaadeen inuusan dhaqankooda eheeyn reer guuraa nimada

3 dii Oday caruurtooda weey bateen qaarna Beeraha ayeey tacbadaan qaarna waa fuundi guryaha dhiso qaarna Bada ayeey kaluun kasoo dabaan qaarna waa gedisleey oo Doon ayeey badeeco dibada uga keenaan qaarna waa gedis leey oo gudaha ayeey badeeco ukala gudbiyaan qaarna waxeey noqdeen Xoola dhaqato Lo`da iyo Wanka Somalida kucaanka tahay ayeey xanaaneeyaan .

3 dii Oday caruurtooda waxeey noqdeen iskaashato uheelan in eey wax wada qabsadaan .

3 dii Oday markeey ogaadeen in eeysan meelna ukala guuri

doonin caruur-toodana ku walaalooween wax wada qabsiga

Odayaashii waxeey go aansadeen in eey is weheshadaan inta noloshooda kadhiman

in lees walaashado ayeey go aansadeen tubta toosan aan ku toloowno markaan dhimano kadib tusbax go`ay yeeysan noqonin Ubadkeena.

waxaa la go aamiyay in Alla bari lasuubiyo .

3 dii Oday Suuqa ayeey ukeceen oo waxeey soo iibiyeen neef Geel ah, 3 Oday nin walba guri ayaa udhisan.

Oday kamid ah xaafadiisa ayaa Geela lagu agxiray

Geela Odaygii lagu soo agxiray xaafadiisa waxaa ujootay gabar yar oo aan weli qaan gaarin 10 jir ah

gabadhii waxeey aragtay Geel waana markii ugu horeeysay nolosheeda eeyba il saarto Geela, gabadhii yareed weey carartay waxeey isugu yeertay gabdhihii deriska la ahaa waana Odayaashii Geela soo iibiyay gabdhihii eey dhaleen ayeeyba

ugu faantay oo waxeey leedahay kaalaya bal eega Geela uu noo soo iibiyay Aabaheey .

waa caruur oo ma oga in qaaraan laga uruuriyay Odayaasha in lagu soo iibiyay Geela, ujeedka loo soo iibiyay eeyba tahay in iyada iyo caruurta lamidka ah Alla bari loogu sameeyo .

gabadhii gabdhaha ufaantay Aqalka ayeey dib ugu laabatay waxeey soo qaadatay cilaan waxeeyna cagaha umarisay Hashii lagu magacaabi jiray Maandeeq.

Hashii waxeey mooday in lagu amrayo in eey fariisato Hashii dhulka ayeey fariisatay Gabadhii tuurta ayeey kamarisay cilaankii soo haray.

gabadhii Geela jeclaatay waxaa laweeydiiyay maxaad cilaanka ugu marisay Hasha? waxeey ku jawaabtay sumad ayaan uga dhigayaa si aan berito loogu murmin in Hasha eey tahay Hasheena .

gabadhii waa laga dhaadhicin kari waayay hasha waa lawada

leeyahay oo saaxiibadaa iyana wax beey ka leeyihiin oo shirko ayaa lagu yahay hasha oo qaaraan Odayaasha laga soo uruuriyay ayaa lagu soo iibiyay .

gabadhii waxeey kudooday hashaan agteena malaga wadaayo Abaheey ayaa iisoo iibiyay inagaa iskaleh .

Odayaashii waxeey ku taliyeen in loodaayo gabadha

Hasha is leheeysiisay.

caawa markeey hurudo ayaa laga soo kaxeeynayaa iska daa ayaa ladhahay.



sidii ayaana layeelay kolkeey huruday gabadhii ayaa Geela laga soo kexeeyay.

Maanyada ayaa lageeyay oo waalaga soo meeyray cilaankii eey calaamada uga dhigtay Hasha.

gabadhii markeey hurdada kasoo toostay, maba joogo geelii waxeey aragtay hashii oo ku agxiray reerkii deriska la ahaa gabadha Aabaheed ayeey usoo dacwootay iyadoo dheheeyso Aabo hasheeyna ayeey naga kaxeesteen Heblaayo xaafadooda

ayeey ku agxirantahay kaalay bal soo eeg.

Odaygii isagoo ismoo-geeysiinayo waxa dhacay ayuu gabadhiisa soo raacay markuu arkay ayuu kuyiri Aabo tan ma ahan hasheena ee iska daa.

waxeey ku adkeeysatay in eey tahay toodii Odaygii ayaa ku jawaabay maxaa cadeeyn ah oo aad u heeysaa in eey tahay mideena .

- cilaankii aan shalay umariyay ayaan ku aqoonsankaraa ee halaga fiiriyo ayeey ku jawaabtay. adigaba kasoo fiiri hadii eey kamuuqato calaamadaas ayaa ladhahay gabadhii dhan walba ayeey ka fiirisay misane wax cilaan ah uma marsana. gabadhii weey iska samirtay weeyna iska aamustay . Dibi ayaa noosoo gedi doonaa ee iska daa ayaa lagu maslaxay gabadhii.

---

waa maalintii 2aad Hasha waxeey ku agxiran tahay Odaygii

xalay loo geeyay agtiisa

Heblaayadii kale ee Hasha lagu soo agxiray iyadana waxeey biloowday sidii gabadhii shalay in eey udhaqanto Cilaan saar weeyba dhaaftay Hashii ayeeyba Rooseeto faruuryaha ka marisay .

waxeey biloowday sidii saaxiibteed in eey ugu faanto gabadhii shalay laga soo kaxeeyay hasha iyo gabadhii kale ee odayga dhalay.

iyadana sidii ayaa loo galay oo markii lagaaray habeen ayaa laga soo dhaqay cilaankii eey marisay Hasha iyo Rooseetadii.

Moolka Badaweeynta ayaa lageeyay.

Hasha waxeey kusoo dabaalatay Xeebta Jaziiro

Xamar weeyne agtiisa Moolka Geelaq lagu magacaabo ayeey dabaal ku gaartay maalintaas ayaa loo bixiyay (Geel laq)

dur- dur iyo dabaal dheer kadib Hashii

waxaa lagu agxiray reerkii Odaygii sadaxaad

markuu waaga beryay Gabadhii shalay Rooseetada usoo marisay geela sidii ayeey ugu soo dacwootay Aabaheed isna sidii gabadhii hore lagu maslaxay ayuu waxa uu dhahay maandhaay iska daa beri ayaan kuusoo iibinayaa **Wan** ama **lax** kii aad rabtid . gabadhii iyadoo samri weeysan ayeey kusoo dulwareegtay Hashii iyadoo karaadineeyso calaamadii eey shalay ku calaama-deeysay Hahsha. Rooseeto xalay saqdhexe laga soo dhaqay miyaa lagu arkayaa .weey iska samirtay iyadana .

Odaygii ugu danbeeyay gabadhiisa jaceeylka eey uqaaday Hashii maandeeq weeyba kasii dartay Xino iyo xamuurad(Rooseeto) ayeey umarisay weliba inta Hooyadeed suuqa uraacday ayeey Hashii usoo iibisay Kuul.

luqunta ayeeyna uga xirtay, Coows inta udhigtay ayeey mac-mac siisay gabdhihii deriska oo idil ayeey iskugu soo yeertay iyadoo dheheeyso Geeleena maanta kaalaya bal soo

eega. faan ayaad igu disheen kuul ayaan uxiray kaalaya bal soo-eega .keena mid kafiican weligiin Aabayaashiin ma idiin soo iibiyeen ?.

Gabadhii kuusha uxirtay Geela habeenkii marka eey hoyatay sidii saaxiibadeed lama yeelin oo waa loodaayay lkn waaga markuu beryay Odayaashii weey israaceen Suuqa ayeey tageen waxeey soo iibiyeen Dibi iyo Orgay. weey soo kaxeeyeen Hashii ayeey ku soo agxireen 3 dii gabdhood ayeey isugu yeereen makaaseey dheheen kaalaya soo kaxeeya Xoolaha dhamaantood, sargad (Sirbi/wajaan) ayeey mid walba udhiibeen xoolihii waa lasoo kaxeeyay oo Bada ayaa lageeyay uqubeeya Hasha maandeeq ayaa ladhahay sidoo kale Diga iyo Orgayga xoolihii oo idil ayeey uqubeeyeen iyagana bada ayeey ku dabaasheen .

maalintaas xafladii dhacday waxaa lagu magacaabay BADGAL (ISTUN) DEBSHID/ NEEYRUUS.

Somali oo idil waa maalin eey ka duceeysatay Qabyaalad.

---

fasiraada Qisada.

3 oday waxeey kala yihiin Jareer iyo gibilcad iyo jaleec.

3 gabdho ee lasheegayo waa shacabka kasoo farcamay.

-gabdhaha Xoolaha eey ku muran sanaayeen waa magaalooyinka lagu dhisay hantida Qaranka sida Xamar Boosaaso Kismaanyo Marka Barawe.iwm.(1)

ujeedka Qisada waxeeytahay Xamar waxaa lagu dhisay hantida shacabka laga soo uruuriyay shacabka ayeeyna kawada dhexeeysaa

Jaleec iyo Jareer iyo Gibilcad weey wada leeyihiin Xamar caawa hadii eey Maandeeq agtaada ku hoyato hamoodin in weyligaaba eey kula joogi doonto .

Sumad Qabiil malahaan karto Caasimada waaba sida cilaanka oo waqtiga ayaa ka daba imaanayo .

dhaxal Aabe waa lawada leeyahay 3 wada dhalatay baa tihiin hantida weey idin wada deeqdaa ee ku walaaloowa.

jaleec iyo jareer iyo reer xamar.

[Boosaaso / Hargeeysa / Kismaanyo/ Baraawe/ Baaydhabo/ Jabuuti/ Garoowe iyo Gaal kacyo /dhamaan caasimad walba waa in laga dhoowro sumad Qabiil . mar walba maanka halagu haayo in lagu dhisay caasimada Qaaraan Hooyooyinka laga soo uruuriyay. Canshuur bulshada laga soo qaaday ayaa daaro lagu dhisay .]

<<<DHAMAAD>>>

.(1)











